Ohio Chapter
INCORPORATED IN OHIO
American Academy of Pediatrics
DEDICATED TO THE HEALTH OF ALL CHILDREN®

Ohio Department of Health

MAXAA ILMAHAYGU UGU BAAHAN YAHAY BAARITAANKA ILMAHA DHASHA?

Carruurta qaarkood oo u muuqda kuwo caafimaad qaba markay dhashaan waxaa laga yaabaa inay qabaan dhibaatooyin saameyn ku leh sida ay u koraan una horumaraan. Baaritaanka dhallaanka cusub waxaa lagu baaraa cunuga xaalado badan oo caafimaad oo aan muuqan marka la dhasho laakiin u baahan daaweyn. Marka dhibaato caafimaad laga helo dhalashada kadib, dhallaanka si dhaqso ah ayey u helaan daaweynta ay u baahan yihiin. Baaritaanka dhallaanka cusub wuxuu hagaajiyaa caafimaadka iyo horumarka ilmaha.

MA OGEYD?

SANNAD KASTA OHIO, **IN KA BADAN**

500 OO DHALLAAN AH

oo u baahan daryeel caafimaad ayaa waxaa lagu gartaa baarista dhallaanka.

BAARITAAN NOOCEE AH AYAA ILMAHAYGA LAGU SAMAYNAYAA?	SIDEE IYO GOORMA AYAA ILMAHAYGA LA BAARI DOONAA?	SIDEEN KU OGAAN KARAA NATIIJADA BAARITAANKA ILMAHAYGA?
Baaritaanka maqalka ee khatarta lumita maqalka.	Ka hor intaadan isbitaalka ka bixin, baaritanka maqalka ilmahaaga ayaa la samayn doona. Waxaa sida caadiga ah lagu sameeyaa qolka hooyada ama qolka ilmaha lagu xanaaneeyo. Kaliya waxay qaadanaysaa 15 daqiiqo oo ilmahaagu wuu seexan karaa inta baaristu socoto.	Baaritaanka maqalka ee ilmaha waxaa qoraal ahaan kuu siin doona shaqaalaha isbitaalka ka hor inta aadan isbitaalka ka bixin. Shaqaalaha isbitaalku waxay sidoo kale kaa caawin doonaan jadwalka baaritaanka maqalka haddii baaritaano dheeraad ah loo baahdo.
Baaritaanka oximetry-ka garaaca wadnaha Dhibaatooyinka la xiriira qaab dhismeedka wadnaha.	Baaritaanka Garaaca wadnaha ee oximetry-ga waa tijaabo fudud oo aan xanuun lahayn oo sida caadiga ah la sameeyo qiyaastii 24 saacadood ka dib dhalashada ilmaha. Mashiinka loo yaqaano pulse oximeter wuxuu cabiraa xaddiga oksijiinta ee dhiiga ilmahaaga iyada oo loo marayo dareemayaal lagu dhejiyay maqaarka ilmahaaga. Dareemayaasha waxaa lagu dhajiyaa gacanta midig iyo labada lug.	Dhakhtarka ilmahaaga ayaa ku siinaya natiijada baaritaanka. Haddii natiijadu ay negatif tahay, ilmahaagu wuxuu leeyahay heerarka caadiga ah ee ogsijiinta dhiigga. Haddii natiijadu ay tahay mid laga helay, ilmahaagu wuxuu leeyahay heerar hoose oo ogsijiin ah oo ku jira dhiiggooda. Tani mar walba macnaheedu maaha in ilmahaagu uu qabo xanuun wadnaha ah. Waxaa loola jeedaa in dhakhtarkaagu uu sii wadi doono inuu kormeero cunugaaga oo laga yaabo in uu baaritaanka ku celiyo wakhti yar kadib ama uu sameeyo nooc kale oo baaritaan ah oo loo yaqaano echocardiogram (iskaanka dhawaaqa wadnaha).
Baariitaanka dhiiga ee lagu ogaanayo khatarta xaalado caafimaad oo kala duwan.	Dhawr dhibcood oo dhiig ah ayaa laga soo ururiyaa dalool ciribta ilmahaaga ah. Duritaanka ciribtan waxaa badanaa la sameeyaa maalinta ka dambeysa dhalashada ilmaha. Dhibcaha dhiigga waxaa loo diraa Xarunta Caafimaadka ee Gobolka Ohio, halkaas oo lagu baaro cuduro badan oo kala duwan.	Baaritaanka dhiiga ee ilmahaaga waxaa loo gudbinayaa isbitaalka iyo dhakhtarka ilmaha. Natiijooyinka waxaa badanaa lagu helaa laba toddobaad gudahood. Inta badan ilmaha, natiijooyinka baaritaanka waa caadi, waalidkuna waxay heli doonaan natiijada baaritaanka caafimaadka ilmahooda. Haddii baaritaanka ilmaha dhasha ah uusan ahayn mid caadi ah, markaas dhakhtarka caafimaadku wuxuu la xiriiri doonaa qoyska wuxuuna diyaarinayaa baaritaan dheeraad ah.

Wixii macluumaad dheeraad ah, fadlan booqo:
https://tinyurl.com/29ta2dhr

Ohio Chapter
INCORPORATED IN OHIO
American Academy of Pediatrics
DEDICATED TO THE HEALTH OF ALL CHILDREN®

Ohio Department of Health

MAXAA DHACAYA HADDII ILMAHAYGU U BAAHDO BAARITAAN DHEERAAD AH?

Dhakhtarka ilmahaaga ayaa kula soo xiriiri doona haddii uu ilmuhu u baahdo baaritaan dheeraad ah. Isaga ama iyada ayaa kuu sheegi doona sababta ilmahaaga loogu baahan yahay in mar kale la baaro iyo waxyaabaha kale ee loo baahan yahay in la sameeyo. Haddii uu ilmahaagu u baahdo baaritaan dheeraad ah, raac talooyinka dhakhtarka. Baaritaanada qaarkood waa in isla markiiba la sameeyaa, baaritaannada kalena waa in la sameeyaa marka uu ilmuhu yara weynyahay. Mararka qaar, ilmahaaga waxaa loo gudbinayaa takhasusle.

BAARISTA MAQALKA 	Haddii uu ilmahaagu ku guuldareysto labadii baaritaan ee isbitaalka, ilmahaaga waxaa loo gudbin doonaa dhakhtarka maqalka si uu baaritaan dheeraad ah ugu sameeyo laba ilaa saddex toddobaad gudahood. Haddii uu ilmahaagu leeyahay maqal la'aan, Barnaamijka Maqalka Carruurtu wuxuu ilmahaaga u gudbin doonaa adeegyada wax ka qabashada hore ee guriga ku salaysan si ay u caawiyaan horumarinta isgaarsiinta iyo luqadda. Aqoonsiga lumista maqalka sida ugu dhaqsaha badan waxay muhiim u tahay ilmahaagu inuu koraan oo uu horumariyo xirfadaha wada xiriirka iyo inuu diyaar u ahaado waxbarashada hore iyo sannadaha dugsiga.
BAARITAANKA OXIMETRY EE GARAACA WADNAHA 	Haddii uu ilmahaagu ku guuldareysto baaritaanka garaaca wadnaha, baaritaan dheeraad ah ayaa lagu sameyn doonaa si loo hubiyo in uu qabo cudur wadnaha ku dhaca. Baaritaankaani waxaa la sameyn karaa ka hor inta uusan ilmahaagu ka bixin isbitaalka ama ilmahaaga waxaa loo gudbinayaa dhakhtarka wadnaha ee carruurta si uu u helo daryeel caafimaad oo dheeraad ah. Xanuunada wadnaha ee halista ah waxay u baahan yihiin daaweyn caafimaad toddobaadyada ugu horreeya ama bilaha ugu horreeya nolosha ilmaha si looga hortago dhimashada ama naafanimada.
BAARITAANKA DHIIGGA 	Haddii baaritaanka dhiiga ee ilmahaagu uu keeno natiijooyin aan caadi ahayn, dhakhtarka ilmahaagu wuxuu isla markiiba kuu qabanqaabinayaa baaritaan dheeraad ah. Mararka qaar, ilmahaaga waxaa loo gudbinayaa takhasusle. Waa muhiim in la ogaado dhallaanka qaba xaaladahan si degdeg ah, si ay u bilaabaan daaweyn caafimaad oo hagaajin doonta caafimaadkooda iyo horumarkooda sida ugu dhakhsaha badan.

ILMAHAYGU MA U BAAHAN YAHAY IN LA BAARO?

Baaritaanka dhallaanka cusub wuxuu badbaadiyaa nolosha wuxuuna hagaajiyaa caafimaadka dhallaanka waxaana looga baahan yahay sharciga Ohio dhammaan dhallaanka ku dhasha Ohio. Xaaladaha qaarkood marka lagu jiro waalidku way diidi karaan in ilmaha la baaro. Waalidiintu way diidi karaan nooc kasta oo baaritaan ah haddii ay khilaafsan tahay diintooda. Waalidiintu waxay sidoo kale diidi karaan baaritaanka maqalka sababo kale awgood. Waalidiinta diida baarista ilmaha dhashay waa inay saxeexaan foom sheegaya inay ka soo horjeedaan baarista ilmahooda.

Xog ileedka: https://odh.ohio.gov/know-our-programs/newborn-screening/resources/brochure-english

Wixii macluumaad dheeraad ah, fadlan booqo:
https://tinyurl.com/29ta2dhr